



May 13, 2020

RFQ# NIEC-MAY2020-001
Bixin Adeeg Internet
Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ)

OGEYSIIS QANDARAAS BIXIN ADEEG

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) waxa uu soo bandhigayaa soo codsashada qandaraas ah ADEEG INTERNET ee Xarunta Dhexe ee GMDQ. Codsida shaabadeysan, oo lagu soo gudbinaayo ayadoo la raacayo faafaahinta la codsaday, si loo aqbalo codsiyada waa in lagu soo gudbiyaa qaab email ah: bids@niec.so koobi la siinaayo bids.niec@gmail.com ugu dambeys June 03, 2020 saacadda 11:59 pm.

Waa mas'uuliyaddaada inaad xaqiijisid in codsigaaga qandaraaska uu gaary cinwaanka kor ku xusan kahor inta aanan lagaarin muddada codsiga uu ku egyahay. Codsida GMDQ uu helo marka la dhafo muddada loogu talagalay ee kor ku xusan, sabab kasta ha noqotee, looma tixgelin doono qiimeynta. Haddii codsigaaga kusoo gubinaysid qaab email ah, fadlan xaqiiji inuu saxiix saaranyahay uuna yahay qaab pdf ah oo aanan lahayn waxa fayrus ah ama cilad.

FAAHFAAHINTA SHURUUDAHA

Adeega la rabo oo kooban	Gelinta Adeeg Internet ee Xarunta Dhexe GMDQ
Goobta Shaqada	Xarunta Dhexe GMDQ – Mogadishu
Muddada Shaqada	1 sano, kordhin 2 sano oo dheeraad ah ayaa suurtagal ah
Taariikhda Billaabitaanka	1da Luulyo 2020
Nooca Lacgta ee Codsiga	<input checked="" type="checkbox"/> United States Dollars
Canshuurta lagu daro Qiimaha	Waa inay ku dheehantahay canshuurta qiimaha iyo wixii kale oo canshuur suurtagal ah
Adeegyada iibka kadib ee loo baahan yahay	<input checked="" type="checkbox"/> Kafaalad qaybaha iyo shaqaale ugu yaraan muddo 6 bilood <input checked="" type="checkbox"/> Taageero Farsamo <input checked="" type="checkbox"/> Bixinta adeega dayactirka/hagaajinta marka loo soo baahdo

Muddada ay ku egtahay soo gudbinta Codsiga	<u>Arboco, June 03, 2020 saacadda 11:59 pm</u>
Luqadda Codsiga	<input checked="" type="checkbox"/> Ingiriis <input checked="" type="checkbox"/> Soomaali
Dukumintiyada lasoo gudbinaayo	<input checked="" type="checkbox"/> Foomka ku xusan Lifaaqa 2aad; <input checked="" type="checkbox"/> Nooca Ganacsiga/Shirkadda oo kooban <input checked="" type="checkbox"/> Shahaadada Ganacsiga ee ugu dambeysay; <input checked="" type="checkbox"/> Shahaadada canshuuraha/Canshuur Bixinta; <input checked="" type="checkbox"/> Caddeyn/Shahaado Ilaalinta Deegaanka ee Shirkadda ama Alaabta <input checked="" type="checkbox"/> Caddeyn in adeega noocan oo kale horey shirkada u qabatay macaamiil
Muddada ay furtantahay soo jeedinta Codsiyada	<input checked="" type="checkbox"/> 60 maalmood <input type="checkbox"/> 90 maalmood <input type="checkbox"/> 120 maalmood
Shuruudaha lacag bixinta	Bil kasta marka la helo qaansheegta
Nooca Qandaraska la saxiixi doono	Heshiis waqti dheer
Shuruudaha Abaalmarint Qandaraaska	<input checked="" type="checkbox"/> Waxqabadka Farsamada/U hogansananta shurudaha iyo qiimaha ugu yar <input checked="" type="checkbox"/> Ogolaanshaha buuxa ee PO/Shuruudaha iyo xaladaha qandaraska guud
Shuruudaha lagu qiimeynaayo Codsiyada	<input checked="" type="checkbox"/> Farsamada Codsiga (70%) <input checked="" type="checkbox"/> Khibrada Shirkada (35%) <input checked="" type="checkbox"/> Habka, ku haboonaanteeda xaaladaha iyo waqtiga fulinta qorshaha (35%) <input checked="" type="checkbox"/> Soo jeedinta Maaliyadda (30%) In loo xisaabiyo saamiga dalab soo jeedinta oo ah qiimaha ugu hooseeya ee ka dhexeeya codsiyada uu helay GMDQ.
GMDQ ayaa ku abaalmarin doona heshiiska:	Keliya Hal Adeeg Bixiye (Shirkad)
Shuruudaha iyo Xaaladaha Guud ee Qandaraaska	Shuruudaha iyo Xaaladaha Guud ee Qandaraaska (Alaabta iyo/ama adeega) ee Lifaaqa 3aad
Lifaaqyada Ogaysiiska Qandaraaska	<input checked="" type="checkbox"/> Foomka Soo gudibinta Codsiga (Lifaaqa 2aad) <input checked="" type="checkbox"/> Shuruudaha iyo Xaaladaha Guud / Shuurudo Gaar ah (Lifaaqa 3aad)
Shaksiga lala xiriiraayo (xiriir qoraal ah keliya)	To: bids@niec.so CC: bids.niec@gmail.com Dhamaan su'aalaha iyo codsiyada si loo kala caddeeyo waa in lagu gudbiyaa qoraal shan (5) maalmood gudahood oo ah maalmaha shaqada ee helitaanka Codsiga Qandaraaska

FAAHFAAHIN FARSAMO

Inta lagu gudajiro muddada qandaraaska, GMDQ waxa uu rabaa in adeeg internet ah la siiyo Komishinarada, Xoghaynta iyo martida xafiisyada GMDQ. GMDQ waxaa uu leeyahay ku dhawaad 300 oo shaqaale. Dhamaan qandaraasleyda waxa laga codsanayaa inay wax ka qabtaan mid kasta oo kamid ah shuruudaha/adeegyada soo socda. Qandaraaslaha waxa uu kusoo dari karaa warbixint kasta oo muhiim ah oo aanan lagu sheegin dalbashada codsiga.

SHARRAXAADDA / TILMAAMAHA ADEEGYADA

1. Hardware and Software:

Dhamaan qalabka network-ka iyo softiweerka lagama maarmaanka u ah fududeynta marin u helka internet-ka ayaa la keenayaa, lagu rakibi doonaa qandaraaslah. Fadlan bixi dulmar guud oo ku saabsan qaabeynta loogu talagalay, oo ay ku jiraan:

- a) Qalabka la rakabi doono/ al isticmaali doono
- b) Goobta laga rakibaayo qalabka
- c) Booska/shuruudaha farsamo/shaqaalaha uu GMDQ soo gudbinaayo
- d) Tirada isticmaaleyaasha uu taageero qaabeynta
- e) Liiska noocyada shaqada/modeelada adeega uu bixinaayo
- f) Qalabka hardweerka ee loo baahanyahay, tusaale., modem, cable modem, iwm.
- g) Sharaxaadda sida adeegga loo cabiriyo saldhig isticmaalaha sii kordhaya
- h) Xeerka suulka ee cabiridda qaabeynta
- i) Cabbirka xiriirinta xogta internetka, tusaale., T1, T3, DS3, iwm.
- j) Softiweerka Server-ka ah ee la bixiyay / la adeegsaday
- k) Softwareka macmiilka ee la bixiyay / la adeegsaday
- l) Borotokoolada uu networka taageero, tusaale, SLIP/PPP, IPX, iwm.
- m) Hannaanka fududeynta qalabka / barnaamijyada kor loogu qaadayo
- n) Adeegyada kale uu bixinaayo internetka

2. Adeegyada:

Dhamaan taageerida iyo adeegyada waxaa masu'uul ka ah qandaraaslaha. Fadlan keen adeegyada soo socda oo faahfaahsan, goobaha, saacadaha la heli karo, nooca, qiimaha, iwm.

- a) Taageero farsamo
- b) Taageero macamiil
- c) Biilasha akoonka isticmaalaha
- d) Dayactirka akoonka isticmaalaha (sameynta, maamulka, tirtirida)
- e) Qeex tillaabooyinka loo sameeyo akoon (laga fiirinaayo aragtida isticmaalaha)
- f) Nidaamka amniga shabakadda
- g) Boos/Taageerada farsamo/Shaqaalaha uu bixinaayo GMDQ

3. Kharashaadka:

Fadlan soo gudbi sharaxaad faahfaahsan ee habka lacag bixinta.

- a) Kharashaadka oo dhameystiran ee isticmaalayaasha oo ay ku jiraan kharashaadka Khadka, kharashaadka dayactirka joogtada ah, kharashaadka khad la'aanta, softiweerka la rabo, iwm.
- b) Kharashaadka dhameystiran ee GMDQ
- c) Qiima dhimista la heli karo, tusaale, qandaraas sanado badan, kharashka inta uu la'egyahay, iwm.
- d) Kharashaadka hakinta adeega ee uu dalbado isticmaalaha ama GMDQ
- e) Hannaanka kharash bixinta bil kasta

FOOMKA SOO GUDBINTA CODSIGA QANDARAASKA**(Foomkan waa in laso gudbiya ayado la isticmaalayo Warqada Rasmiga ah ee Shirkada)**[Goobta].
[Taariikh]

Ku: [Ku qor: Magaca iyo Cinwaanka Waaxda libka ee GMDQ]

Mudane/Marwo:

Anagoo, hoos ku saxiixan, waxaan si buuxda u aqbalnay Shuruudaha iyo Xaaladaha Guud ee GMDQ. Waxaan halkaan kuso bandhigaynaa bixinta alaabaha hoos ku xusan ayagoo waafaqsan faahfaahinta iyo shuruudaha GMDQ sida kuxusan RFQ tixraaca lambarka _____:

Foomka Lacag Soojeedinta**ADEEGA INTERNETKA**

(Marka la eego xaqiiqda ah in ISPs ay siiyaan macaamiisha adeegyo internet / qorshayaal kala duwan, fadlan ka soo qaad ugu yaraan 3 qorshayaal adeeg oo kala duwan, iyo qiimaha midkasta)

Qalabka iyo Rakabidda		Faahfaahin	Qayb	Qiimaha Qaybta (USD)	Wadarta Qiimaha	Wadarta Guud
1	Qorshaha Internetka					
	Rakibidda Qalabka					
2	Qorshaha Internetka					
	Rakibidda Qalabka					
3	Qorshaha Internetka					
	Rakibidda Qalabka					

Magaca Qofka Mas'uulka ah: _____

Saxiix: _____

Jagada Mas'uulka: _____

Taariikh: _____

Shuruudaha iyo Xaaladaha Guud

1. OGOLAANSHAHA HESHIISKA

Heshiiskan waxaa kaliya oo la aqbali karaa saxeex bixiyaha adeega iyo soo celinta nuqulka aqabalaadda ama soo gudbinta adeegyada waqtigii loogu talagalay iyadoo la raacayo shuruudaha Heshiiskan, sida halkaan la qabdo. Ogolaanshaha Heshiiskan waxa uu dhaqangalayaa heshiis ka dhaxeeya labada dhinac taas oo xuquuqda iyo waajibaadka ee labada dhinac lagu maamulaayo keliya shuruudaha qandaraaskaan, oo ay ku jiraan Shuruudaha Guud. Majiro qodob dheeri ah ama wax aana is-waafaqsanayn ee uu soo jeediso shirkadda oo waajib ku noqonaaya GMDQ haddii aan ogolaansho oo qoraal ah laga haysanin masuulka awoodda u leh ee GMDQ.

2. KHARASH BIXIN

2.1 GMDQ si uu u buuxiyo Shuruudaha lagu xusay Heshiiskan, uu ku bixiyaa kharashka muddo 30 maalmood gudahooda marka uu helo qaan-sheegadka adeeg bixiyaha iyo nuqulada dukumintiyada ee geynta sida lagu caddeeyay Qandaraaskaan.

2.2 Bixinta qaan-sheegashada ee kor ku xusan waxay muujineysaa dhimis kasta oo lagu muujiyey shuruudaha lacag-bixinta ee Heshiiskan, iyadoo lagu bixinaayo kharashka muddada loogu talagalay ee shuruudaha ku xusan.

2.3 ilaa ogolaansho laga helo GMDQ, adeeg bixiyaha waa inuu soo gudbiyaa hal qaan-sheegad sida uu qabo Heshiiskan, Qaan-sheegad waa in lagu sheegaa lambarka aqoonsiga Qandaraaska.

2.4 Qiimaha lagu sheegay Qandaraaskaan lama kordhin karo marka laga reebo qoraal heshiis deg-deg ah ee GMDQ.

3. XUQUUQDA GMDQ

Haddii Adeeg bixiyaha uu kasoo bixi waayo waajibaadka ku xusan shuruudaha iyo xaaladaha Heshiiskan, oo kamid aha balse aanan ku koobneyn inuu heli waayo rukhsadaha dhoofinta ee lagama maarmaanka ah, ama keenista dhamaan ama qayb kamid ah adeegyada taariikhda keenista, waxaa laga yaabaa in GMDQ, kadib marka uu siiyo Adeeg Bixiyaha ogeysiis sababeysan oo aanan ku xadgudbeynin xuquuqaha, uu ku dhaqaaqi karaa hal ama in kabadan xuquuqaha soo socda:

3.1 Ka dalbado adeeg bixiyaal kale dhamaan ama qayb kamid ah adeegyada, taas oo GMDQ uu mas'uuliyadda saari karo Adeeg bixiyaha wax kasta oo dheeraad ah oo uu Guddiga galo.

3.2 Diido inuu aqbalo keenista dhamaan ama qayb kamid ah adeegyada.

3.3 Joojiyo/laalo Heshiiskan iyada oo aan wax mas'uuliyad ah ka saarneyn eedaymaha joojinta ama aysan jirin mas'uuliyad kale oo nooc kasta ah oo laga rabo GMDQ.

4. KEENIS XILI DAMBE

Ayadoo aanan la xaddidaynin shuruudaha iyo waajibaadka labad dhinac ee heshiiska, haddii Adeeg Bixiyaha uu awoodi waayo inuu bixiyo adeega taariikhda ku xusan Heshiiskan, Adeeg Bixiyaha waa inuu (i) si deg-deg ah uu GMDQ ula tashto si loo go'aamiyo sida ugu dhaqsiiyaha badan ee lagu bixin karo adeega (ii) uu isticmaalo qaab bixin adeeg oo dege-deg ah, kharashkana laga rabo Adeeg Bixiyaha (haddii dib-u- dhaca uusan ku imaan Awood Xad-dhaaf ah), haddii GMDQ si macquul ah uu u codsado.

5. U-XILSAARID IYO MUSALIFID

5.1 Adeeg Bixiyaha ma ahan, marka laga reebo, helitaanka ogolaansho qoraal ah ee GMDQ, loo igmado, beddelid, ballan qaad ama sameynta muujin kale ee Heshiiskan, ama qayb kasta oo kamid ah, ama mid kamid ah xuquuqaha Adeeg Bixiyaha ama waajibaadka ku xusan Heshiiskan.

5.2 Haddii Adeeg Bixiyaha uu musalifo ama isbedel musalifid ah uu ku yimaado kontoroolka Adeeg Bixiyaha, GMDQ waxaa laga yaabaa, iyada oo aan lakala soocin wax xuquuq ah, inuu baabi'iyoo/joojiyo Heshiiskan asagoo siinaayo Adeeg Bixiyaha ogeysiis qoraal ah ee joojinta heshiiska.

6. MAMNUUCISTA XAYEYSIINTA

Adeeg Bixiyaha waa in uusan xayeyiin ama si kale uusan u shaacinin inuu adeeg siinaayo GMDQ iyadoon mar kasta fasax gaar ah laga helin GMDQ.

7. SHAQAALEYSIINTA CARUURTA

Adeeg Bixiyaha wuxuu matalaa oo dammaanad qaadaa in cid xiriir la leh aysan ku lug lahayn wax kasta oo kahor imaanaya xuquuqda lagu xusay Axdiga Xuquuqda Caruurta, uu kujiro Qodobka 32, kaas oo dalbanaya in caruurta laga ilaaliyo inay shaqo khatar u keeni karta ay qabtaan ama carqaladeynta waxbarashada caruurta, ama wax u dhimi kara caafimaadka caruurta, ama jir ahaan, maskax, ruux, niyadda ama horumarka bulshada.

Jebinta kasta ee wakiilnimada iyo dammaanad qaadkaan waxa uu GMDQ siinaayaa inuu si deg-deg ah u joojiyo/baabi'iyoo Heshiiskan isagoo wargelinaaya Adeeg Bixiyaha, ayadoo GMDQ uusan qaadeynin wax masu'uuliyad ah ee jebinta heshiiskan.

8. XALINTA KHILAAFKA

8.1 Ogolaansho Xal Gaaris. Labada dhinac waa inay u adeegsadaan dadaalkooda ugu wanaagsan xalinta muran kasta oo yimaada, sheegasho kasoo baxda, ama la xariirta Heshiiskan ama jebintiisa, joojinta ama sii jiritaankiisa. Halka labada dhinac ay rabaan inay ku xaliyaan qaab heshiisiin ah, heshiiska waa inuu u dhacaa si waafaqsan UNCITRAL, ama hannaan kale oo ay ku heshiiyaan labada dhinac.

8.2 Dhex-dhexaadin.

Haddii aysan, nooc kasta oo khilaaf, ama sheegasho ka timaada Heshiiskan oo u dhaxeysa Labada Dhinac, ama jebinta, joojinta lagu xaliyo si ogolaansho ah muddo **lixdan 60 maalmood** kadib marka uu hal dhinac helo codsiga dhinaca kale ee la xariira xal gaaris ogolaansho ku dheehan, khilaafka noocan ah, ama sheegashada waxa loo gudbinayaa dhex-dhexaadin si waafaqsan UNCITRAL, oo ay kujirto qodobada sharciyada waafaqsan. Maxkamadda gar-qaadida ma lahan awood ay ku bixiso ciqaab. Labad dhinac waa inay ogolaadaan dhex-dhexaadinta inay tahay xalka ugu dambeeya ee arrimaha la isku heysto.

9. AWOODA WAX KA BADALIS:

Iyadoo la raacaayo Xeerka Maaliyadda iyo Sharciyada DFS (GMDQ), kaliya sarkaalka awood uu siiyay GMDQ ayaa leh awooda inuu ogolaado asagoo matalaaya GMDQ wax ka badal kasta ee Heshiiskan, kana tanaasulo mid kasta oo kamid ah qodobada ama wax kusoo daridda heshiiska nooc kasta uu yahay. Si waafaqsan, wax ka badel kasta oo lagu sameeyo Heshiiskan ma ahan mid jira ama lagu dabaqi karo GMDQ hadii uusan jirin saxiix wadajir ah ee Wakiilka GMDQ iyo Qandaraaslaha.